

Waa caymis la yaab leh

Dhammaan dadyoowga daawo laga siiyay goobaha daryeel-caafimaadeedka dalka Iswiidan, ka qaybgalay tijaabooyinka daawaynta, ka iibsaday daawo farmashiyooyinka dalka Iswiidan, ama dukaan ruqsad u haysto in uu iibiyo daawooyinka aan u baahnayn ruqsadda takhtarka, daawooyinkaas oo ay soo saareen shirkadaha daawooyinka ee xubin ka ah LFF *Service AB*, oo aaminsan in waxyeello ka soo gaareen daawooyinki, waxay xaq u lee yihiin, in ay dacwo u qortaan *Svenska Läkemedelsförsäkringen AB* [Caymiska daawooyinka dalka Iswiidan], sidii dhibkooda hab madaxbanaan loo qiimeeyo. Sida ugu dhaqsida badan ee dhaawacyada daawooyinka loo qiimayn karo loona heli karo magdhowga dhaawaca, waxaa weeyaaniyadoo loo dacwodo *Läkemedelsförsäkringen*. Dhibaneha wuxuu dacwadiisa hor geyn karaa maxkamad, haseyeeshe waxaa laga doonaa caddayn aad u culus.

Dhaawacyadee ayuu caymiska dabooli kara?

Caymisku wuxuu hirgala laf ahaantaada u dhaawac ku soo gaaro, taasoo la hubo in daawo ay sababtay isla markaana takhtarkii daawada ku qoray usan ka warqabin. Dhaawucu waa in ku darran yahay cudurka daawada lagu siiyay dartiisa.

Caymisku ma hirgalo haddii daawada dhaawaca sababta ay tahay kuwa dabiiciga ah iwm. Magdhowga dhaawaca dimirka suurtagal ma noqon karto, waa haddii aysan jirin caddayn ku salaysan dhawaaca la taaban karo. Haddii aadan hubin in xaaladaada caymiska dabooli karo iyo in kale, waxaad ku dhaqaaqi kartaa wargelin, taasoo suurtagelin doonto in laga arrinsado.

Sidee dhaawaca daawada looga dacwooda?

Dhaawaca daawada waxaa looga dacwooda iyadoo foom u gaar ah la adeegsanaayo. Kaasoo la heli karo isagoo luqado kala duwan ku qoran. Waa muhim in dhibaneha laf ahaantiisa u ku dhaqaaqo dacwada, laakinse waxaa buuxinta foomka ka caawini karo *kurator* (la taliye) ama *patientombud/patientombudsman* (wakiilka bukaan-socodka). Foomka dacwada dhaawaca u soo dir:

SLF (Svenska Läkemedelsförsäkringen)
Box 17608
118 92 Stockholm
Tel. 08-462 37 00

Kadib markii foomka aad hoosta ka saxiixdo oo aad soo gudbiso, waxaad shirkadda caymiska siinaysa awood ay goobaha daryeel-caafimaadeedka kaga dalbato qoraalada xasuu-qoriyada iyo cadaymaha takhtarka ee adiga kugu saabsan. Taasoo u sabab ah qiimaynta xaq helida magdhowga.

Sidee ayaa dhaawaca daawooyinka la xiriira loo qiimeeyaa?

Markii aad xareysatid dacwaddada, waxaa nidaamka marinaya dacwado sixitaan yaqaan qof ah. Markaana waxaad ka heli doontaa shirkadda caymiska xaqiijin ah in kiiskaagii lagu gudo jiro. Badanaa, dacwado saxuhu wuxuu u baahan doonaa inuu dalbado diiwaannadaadii daawo ahaaneed, caddeymaha waxyaabaha aan saxda ahayn iyo tafaasiil uu ka helo dhakhtarka xeel dheeraha ku ah dhaawaca. Nidaanka isku dubba ridka iyo qiimeynta waxaa lagu sameeyaa wada tashiyo lala sameeyo khibradleyaal ku xeel dheer sayniska caafimaadka. Markii qiimaynta lasoo dhammaystiro, waxaa lagu soo wargelin doonaa in aad xaq u leedahay ama in aadan xaq u lahayn wax magdhaw ah. Go'aankaan markii la qaato, qiimayn ku saabsan xaddiga magdhawgu gaarayo ayaa la sameeyaa. Taana waxaa lala beegsadaa sida ku qoran mabaadii'da guud ee lagu xukumo Qodobka Qaan sheegadka ee loo yaqaan Tort. Ujeedadu waxaa weeye inaad sii ahaato qof ku jira isla xaaladdii dhaqaale ee aad ku jiri laheyd si kale markii loo eego haddiiba dhaawucu uusan dhici lahayn.

Ilaa immisa ayaa nidaam marintu qaadataa?

Celcelis ahaan nidaam marintu waxay qaadataa afar bilood laga bilaabo taariikhda aad xareysid dacwaddaada ilaa taariikhda aad ka helaysid go'aanka la xiriira xaq aad yeelan doontid magdhawga. Kiisasku waa kala duwanaan karaan maxaa yeelay sida ay kala culus yihiin awgood.

Waqtiga loo baahan yahay in lagu qiimeeyo inta uu le'eg yahay magdhawgu wuu kala duwanaan karaa maxaa yeelay waxay ku xiran tahay haddii ama haddii aan dhaawaca lagu salayn karo/Karin si toos ah ama haddii ay tahay in go'aan qaadashada la daahiyoo ilaa iyo inta arrimahaas laga saleynayo jiritaankooda saxda ah ee macquulka ah ama waxtarro jirro ahaaneed laga soo bandhigayo.

Maxaa caymisku daboolaa?

Caymiska Daawooyinka, Caymiska Bukaanka iyo Caymiska Waddooyinka waa saddex caymis oo wada shaqeeya. Waxay bixiyaan magdhaw aan si caadi ah aysan u bixinin caymisyada caadiga ah ee daryeelka caafimaadku. Markii go'aanka magdhaw bixinta la sameeyo, xaddiga lacageed intuu yahay waxaa lagu go'aamiyaa sida ku qoran nidaamyada Qodobka Qaan sheegadka ee Tort -Jadwalladana waxaa la saxaa sanadkiiba mar. Haddii dhaawacaagu u baahan yahay ka warqab daaweyn ah ama in isbitaal lagu geeyo, caymintaas waxaa daboolaya caymiskaaga caafimaad caadiga ah. Hase yeeshee, Waxaa laga yaabaa inaad xaq ugu yeelatid magdhaw ku saabsan xanuunka iyo dhibka ku haya Caymiyahaaga Daawooyinka dhibaatooyinka ka yimaada. Waxaad kaloo xaq u yeelan kartaa inaad heshid magdhawga kharajadkii dheeriga ahaa ee aad gashay dhaawaca awgiis. Risiidyo/isliibyoo waa in laga keenaa arrintaas.

Caymisku waxaa kaloo laga yaabaa inuu kaa xaq siiyo dakhligii kaa lumay intii aad jirranayd. Haddiiba

dhaawacaagu yahay mid joogto ah, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelatid magdhaw ah cilladda jir ahaaneed ama waxyeellada rasmiga ah. Xaaladda jiritaanka in arrintu sax tahayna waxaa lagu qiimeeyaa iyadoo lagu saleeyo nidaamo gaar ah oo jira. Haddii natiijada dhaawacaagu noqoto mid kharajaad dheeraad ah oo joogto ah ama waxyaabo aan lagu talo gelin, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhawga arrimahaas. Waxaad kaloo xaq u yeelan kartaa inaad heshid magdhaw ah dakhligii kaa lumay waqtigii lagu kordhiyay xilliga ahaa. Tanina waxay ku imaanaysaa qaab ah qiime lagu kabayo dakhligii kaa lumay guunoyinkii aad qaadan jirtay sanad walba. Mar marka qaarkood wax la qiyaasi karo ma ahan in qofku awood u heli doono ku soo laabashada shaqada iyo in kale, xaaladdu sidaa markay noqotana shirkadda caymisku waxay la socon doontaa xaaladda caafimaad ee qofku ku sugan yahay siday noqoto ilaa arintaan laga meel dhigayo.

Ma suurtagal baa in aan racfaan ka qaato?

Haddii aadan qanacsanayn isla markaana aad jeceshahay inaad dood ka geysatid go'aanka uu qaatay Caymiyaha Daawooyinku, waxaad racfaan u qoran kartayaa Guddiga Dhaawacyada Daawooyinka, kaas oo ah guddi madax bannaan oo ka kooban khubaro sayniska caafimaadka daawooyinka ah, dul joogto dad ah iyo wakiillo ka socda qaybta sharciga, oo ay soo magacawday dawladdu. Ikhtiyaar guddigu waa mid la tashi ah, laakiin Caymiyaha Daawooyinku caadiyan wuxuu raacaa waxyaabaha ay soo jeediyaan. Racfaan looga soo horjeedo talo soo jeedinta Guddiga Dhaawaca Daawooyinka waa la samayn karaa sidoo kale. Heerkaas markii arrintu gaartana wixii dood ah waxaa lagu dejin doonaa dhexdhexaadin.

Yaa caymiska ka dambeeya?

Shirkadaha daawooyinka ee dalka Iswiidan ka hawlgala badidooda (boqolkiiba 98,2% daawooyinka la iibiyay) waxay ka tirsan yihiin *Läkemedelsförsäkringen* [Caymiska daawooyinka]. Shirkaduhu waa shirkadu cilmibaareyaal ah iyo kuwa iibiyaa daawooyinka guud ama daawooyinka lamid ah ee dibada laga keeno. Kuwa kale ee ka tirsan waxaa weeyaan kuwa farsamada unugyada, kuwa ku dhaqaaqa tijaabooyinka daawada, kuwa qaybiya daawooyink iyo farmashiyada *Apoteket AB* (*Apoteket Produktion* iyo *Laboratorier*, *APL*) waxay ka tirsan yihiin *LFF Service AB*.